

Barnaamijyada Medicare Savings Programs Ayaa Dhaqaaleya Lacagaha Lagu Adeegsado Medicare

In ka badan \$2,400 sanad kasta

Lacagta dib ugu celi jeeggaaga Damaannada Bulshada!

Ku saabsan Barnaamijyada Medicare Savings Programs

Waxaa jira afar barnaamijyo oo ka jira Gobolka Washington:

Barnaamijka 1 Barnaamijka Kafaa'ideystaha U qalma Medicare (QMB)

- Bixiya lacagahaaga joogtada ah ee caymiska ee Qaybta A iyo Qaybta B
- Bixiya lacagaha laga jari karo
- Bixiya lacag-bixinnada la wadaago marka laga reebo lacagaha daawooyinka dhakhtarku qoro

Barnaamijka 2 Kafaa'ideystaha Medicare ee Dakhliga- hooseeya ee La Cayimay (SLMB)

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta B

Barnaamijka 3 Barnaamijka Shakhsiga U-qalma (QI-1)

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta B

Barnaamijka 4 Shakhsiga Shaqeeya Naafada ah ee U-qalma (Qualified Disabled Working Individual) (QDWI)*

- Bixiya lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta A

Ogow Haddii Aad U-qalanto

Isticmaal xaashidan lagu shaqeeyo ee shakhsiyeed.

Raac tallaabooyinka fudud ee hoos ku xusan ka-dibna barbardhig wadarada guud shaxda hoose si aad u oogaato haddii aad u-qalanto Barnaamijka Lacag Dhaqaaleynta ee Medicare (Medicare Savings Program).

1. Qor dakhliga qoyskaaga billaha ah ee **guud**: \$ _____
2. Ka jar \$20 (hal ka jarid ayaa loo oggol yahay qoyskiiba): \$ _____
3. **Wadarta Dakhliga**: \$ _____
4. Haddii dakhligaaga billaha ah uu yahay ama ka hooseeyo mid kasta oo ka mid ah heerarka ku xusan shaxda hoose, waxaad u qalmi kartaa mid ka mid ah barnaamijyada Medicare Savings Programs.

Jaangooyooyinka Dakhliga Barnaamijyada Medicare Savings Programs

Nooca Barnaamijka Medicare	Dakhliga Billaha ah (Shakhsi)	Dakhliga Billaha ah (Lammaane)
Barnaamijka 1 QMB	Ilaa \$1,483	Ilaa \$2,004
Barnaamijka 2 SLMB	Ilaa \$1,616	Ilaa \$2,185
Barnaamijka 3 QI-1	Ilaa \$1,855	Ilaa \$2,510
Barnaamijka 4 QDWI*	Ilaa \$2,680	Ilaa \$3,628

*Dhaqangal ah 4/1/2026

Barnaamijka QDWI ee loogu talagalay dadka naafada ah ee shaqeeya wuxuu leeyahay ka jarid ama ka dhimis gaar ah oo la xiriirta dakhliga la kasbado, sidaa daraaddeed ayaa waxaad u baahan doontaa in aad u wacato caawimaadda go'aaminta xaq-u-yeelashada barnaamijkan.

Sideen u Codsadaa?

Way fududahay! La xiriir mid ka mid ah ikhtiyaaradan soo socda:

- Hel xafiiska adeegyada bulshada (CSO) ee kuugu dhow: dshs.wa.gov/office-locations
- Barta Internet-ka, ka booqo mareegtadan: washingtonconnection.org/home/
- Waxaad ka waci kartaa Maamulka Daryeelka Caafimaadka 1-800-562-3022, lambarka dheeraadka ah 16129 si codsiga boostada laguugu soo diro.
- Kala xiriir La-taliyaha Dheefta Caymiska Caafimaadka Gobolka oo Dhan "Statewide Health Insurance Benefit Advisor" (SHIBA) lambarkan 1-800-562-6900 oo weyddii in laguugu xiriiriyo xafiiskaaga degaanka ee SHIBA.
- Si aad u hesho Caawimaadka Dheeraadka ah ee qaybta D ee Medicare

Kala xiriir Maamulka Damaannada Bulshada 1-800-772-1213 ama booqo: ssa.gov/medicare/part-d-extra-help

Haddii aad tahay ka-faa'iideystaha Medicare

Waxaad xaq u yeellan kartaa barnaamij kuu dhaqaaleyn kara in ka badan \$2,200 sanadkii. Barnaamijyada Medicare Savings Programs ayaa caawiya dadka u qalma iyaga oo ka bixinaya lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Medicare, lacagaha laga jari karo iyo kharashaadka kale ee la xiriira Medicare. Waxaad yeellan kartaa Medicare-ka caadiga ah ama qorshaha daryeelka Medicare ee la maareeyo.

✓ Codsashadu waa mid fudud.

Wac maanta haddii aad u baahantahay macluumaad iyo caawimaad — waxaa laga yaabaa in aad lacag dib u gelieyso jeebkaaga!

✓ Waa maxay noocyada kharashaadka la caymiyo?

Barnaamijyada Medicare Savings Programs waxay caymin karaan kuwan soo socda:

- Lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta A
- Lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta B
- Caymiska-la-wadaago ee Medicare
- Lacagaha laga jari karo ee Medicare

✓ Sideen ku Oggaan karaa haddii Aan u qalmo?

Kumanaan dad ah oo ku nool Gobolka Washington ayaa u qalma Barnaamijka Medicare Savings Program. Si aad u oggaato haddii aad xaq u yeellan karto, eeg shaxda dakhliga ee ku qoran waraaqdan daabacan. Haddii dakhligaaga billaha ah uu yahay ama ka hooseeyo mid kasta oo ka mid ah heerarka shaxda kore waxaad xaq u yeellan kartaa mid ka mid ah Barnaamijyada Medicare Savings Programs.

✓ Faa'idooyinkan ma yihiin kuwo saameynaya hantidayda?

Maya, ma jiro soo celin hanti oo loogu talo galay Barnaamijka Medicare Savings Programs.

Haddii aad u baahan tahay adeeg taageero gaar ah, ama u baahan tahay dokumentiyo qaab kale ah ama luuqad kale ku qoran, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

